

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 17 Luulyo 1981 L. 7/bis

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laaanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S.

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100 Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

KOORNIN

Q A Y B T A

K O O W A A D

S H A R C I

SHARCI L. 41 ee 15 Luulyo 1981, Oggo- Bogga 1142
laansho heshiis amaaheed oo dhexma-
ray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga
Soomaaliya iyo Sanduuqa Ururka
Dawladaha Batroolka dhoofsada.

SHARCI L. 41 ee 26 Luulyo 1981, Meel ma- » 1144
rin Heshiis.

L A W N. 41 26th Luly 1981, Instrument » 1145
of Ratification.

QAYBTA

LABAAD

W. M.

QAYBTA

SADDEXAAD

TALOOPYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

WAKAALADDA M. QARANKA

MAXKAMADDA G. J/HOOSE Lu- 10.5.81, » 1146
mid Buug Kayd L. 5538 ku qoran Cab-
diraxmaan Cali Maxamed L. 890.

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.7.81, » 1147
Lumid Buug Kayd L. 77458 ku qoran
Maxamed Jeylaani Soomoow L. 891

SHARCI lambar 41, taariikh 15 Luulyo 1981, Oggolaan-sho heshiis amaaheed dhexinaray JDS, iyo Sanduuqa Ururka Dawladaha Batroolka dhoofsha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIGELINAAYA: oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Ururka Dawladaha Batroolka dhoofsha oo ku saabsan amaah lacageed oo dhan sagaal malyuun doolar oo lagu taageerayo dheellitirka xisaabaha dibadda.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Fiyenna (Vienna) ee Dalka Austriya, marka ay taariikhdu ahayd 27 Maajo 1981.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan, isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan Sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintooda la waa fajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo heshiiska Sharcigan lagu soo timaamay.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 15 Luulyo 1981

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 41 ee 26 Luulyo 1981, Meelmarin Heshiis.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Amaahda ee Lam. yahay 231 laguna taageerayo «Dheellitirka Xisaabaha Dibedda» oo dhexmaray Dawladda JDS iyo Sanduuqa OPEC laguna kala saxeexday Fiyanna ee dalka Usteeriya, 27kii Maajo, 1981;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaaha Shacbiga Qaranka ee Heshiiska taariikhdiisuna ahayd 5tii Luulyo, 1981.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerkan soo socda:

Qod. 1aad

Heshiiska Amaahda Lam. 231 ee lagu taageerayo Dheellitirka Xisaabaha Dibedda oo dhexmaray JDS iyo Sanduuqa OPEC laguna kala saxiixday Fiyanna ee dalka Usteeriya 27kii Maaji, 1981, WAA LA MEELMARIYEY.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelan doonaa JDS astaan sharci ah.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha JDS; waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Mogadishu- 26.7.1981

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

LAW No. 41 26th July 1981 Instrument of Ratification.

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

(The President)

HAVING SEEN: Article 67 para5, Article 82 para 4 and Article 72 para 1 of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: The Loan Abreement No.231 for the «Balance of Payments Support» between the Government of the Somali Democratic Republic and the OPEC Fund for International Development signed at Vienna, Austria, on May 27, 1981;

TAKING NOTE: Of the approval of the People's Assembly of the said Agreement dated 5th July 1981.

Hereby promulgates the following Decree:-

Article I

The Loan Agreement No.231 for the Balance of Payments Support between the Government of the Somali Democratic Republic and the OPEC Fund for International Development, signed at Vienna, Austria, on May 27,1981, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic.

This Decree shall enter into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic; and shall be pulished in the Official Bulletin of the State.

Muqdisho, 26.7.1981

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE

President of the
Somali Democratic Republic

— MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE —
GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA G. J/HOOSE

MARKUU AKHRIYEEY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBSADAY: In Buugga Kaydka Bankiga ee Lumay ee lambarkiisu ahaa 5538, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Kismaayo kuna qornayd lacag dhan Shs. 2.000/= (Labakun) uu iska leeyahay Jaalle Cabdiraxmaan Cali Maxamed.

HADDUU ARKAY: Qodobka 69aad sharciga lamb. 2 ee 9.9.1965.

WUXUU XEERIYEEY

In la baabi'iyoo (Amortamento) Buugga Kaydka lamb. 5538 oo k uqoran magaca Cabiraxmaan Cali Maxamed, ayna ku jirto lacag dhan Shs. 2.00/= (Labakun)).

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Kismaayo u beddelo Cabdiraxmaan Cali Maxamed, Buugga Kaydka ee Bankiga ee kor ku tilmaaman, una sameeyso mid la mid ah, kaddib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 (Tobaniyoshan) Maalmood, maalin-ta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan ishortaag laga keenin.

Kismaayo, 10.6.1981

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. J/HOOSE

(Dr. Cumar Yuusuf Faarax)

— MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR —
GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo lam-
balrkiisu ahaa 11458 lagana soo saaray Bankiga Ga-
nacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna
qorneyd lacag dhan Shs. 3212/= uu iska lahaa Maxa-
med Jeylaani Soomow sida ku cad warqadda lam. 1133
taariikh 29.7.81 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soo-
maaliyeed laanta 3aad ;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam.2 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyoo (Amortamento) Buug Keyd lamb.
11458 oo ku qoran magaca Maxamed Jeylaani Soomow
ayna ku jirto Shs. 3212/=.

WUXUU FASAXAY

In Banki Ganacsiga iyo Keydka laanta 3aad u bed-
delo Maxamed Jeylaani Soomow Buugga Keydka ee
kor k utilmaaman una sameyso mid la mid kaddib
markay ka soo weerto muddo aan ka yareyn 30 maal-
mood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Ras-
miga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishor-
taag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.7.1981

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)